

HIWAAYADDA OO KUU DHOW

Hiwaayadeynta nooca Finland waxaa Hämeenlinna ku fulinaya mashruuca Harrastus ihan lähellä (Hiwaayadda oo kuu dhow). Waxqabadkaas waxaa laga bilaabay dugsiyada hoose-dhexe ee Hämeenlinna muddadii lagu jiray gugii 2021. Waxaa hiwaayadaha la qabanqaabiyyaa inta ka horreysa maalinta dugsiga ama maalinta dugsi-dhigashada marka la dhamaysto, waxaana lagu qaadanayaa dugsiga ama agagaarkiisa. Hal mar oo hiwaayadda laga qayb-qaadanayo waxaay qaadanaysaa qiyaastii 60 daqiqo waxqabadkaasina waa mid lacag la'aan u ah dadka ka qayb-qaadanaya. Xiisadaha hiwaayadaha ee toddobaadlaha ah ka sakow waxaa dugsiga lagu qabanqaabinayaa kioskeyaal jimicsi iyo hiwaayado leh oo suuro gal ay ku tahay in wax laga ogaado hiwaayadaha kala duwan. Wareegyada iyo munaasabadaha kala duwan waxaay qayb udub dhexaad ah ka yihii mashruuca HIL.

Waxaa ku diyaar ah hiwaayado kala duwan oo jimicsi iyo hiddo iyo dhaqan ku sal leh waxaana jadwalkooda sannad-dugsiyeed kasta loo qaban-qaabinayaa iyadoo la maqlayo waxyaabaha ay rajeynayaan dugsileydu. Dhammaan xiisadaha HIL lagu qabanqaabiyyaa waa kooxo furan oo hiwaayado oo aanan dugsiga ku xidhnayn, taas oo keenaysa in qofku uu ka qayb-qaadan karo waxqabadyada kala duwan ee dugsiyada. Hiwaayadaha hore ayaa layskaga sii diwaan galiyaa iyadoo loo marayo nidaamka Hellewi. Jadwalka mar walba la cusboonaysiinayo iyo linkiga layska diwaan galin karo waxaa laga heli karaa halkan: www.hameenlinna.fi/hil

Macluumaad dheeri ah waxaa mashruuca ka bixinaysa khabiiradda mashruuca Niina Heikkilä.

niina.heikkila@hameenlinna.fi, t. 040 703 8400